

## TUSMADA BUUGGA

Doorka iyo Masuuliyadaha .....	2
<b>X u q u u q d a</b> .....	4
Xaadirida .....	4
Kahor iyo Ka dib Dugsiga .....	4
Basaska .....	5
Ururada,Ka-qeybqaadashada Ardayga .....	6
Ixtiraamka Bulshada, Masuuliyadda.....	6
Nidaamka Cabashada – Ardayga iyo Waalidka, Wakiilka .....	6
Labiska iyo Is-qurxinta .....	6
Daroogada iyo Khamriga.....	7
Ujarada iyo Ganaaxa.....	7
Badbaadada Raashinka .....	7
Xorriyada Hadalka iyo Kulanada .....	8
Cago-jugleyn, Dhibaateyn,Duleyn, Dhibaateynta Galmada .....	8
Adeegsiga.....	8
Internet-ka .....	8
Lumis, Xaditaanka, Waxyeleynta Hantida.....	9
Daawada, Xaaladaha Caafimaad ee Degdega ah .....	9
Daawada.....	9
Qishka,Khayaanada .....	9
Waxyaabaha Mamnuuca ah.....	9
Baadhitaanka – Sanduuqyada iyo Baadhitaanka Ardayga .....	10
Macluumaadka Ardayga.....	10
Imtixaanka, .....	10
Qiimeynta .....	10
Imtixaanka.....	10
Qiimeynta.....	11
Hadidaad .....	11
Buuriga(Tubaako).....	12
<b>A n s h a x a</b> .....	13
Heerarka.....	14
Anshaxa.....	14
XAADIRITAANKA IYO IMAANSHAHA WAQTIGII LA RABAY .....	16
ILAALINTA HANTIDA .....	16
ILAALINTA AMNIGA JIREED IYO MIDKA MASKAXEEDBA .....	17

JAWI WAXBARASHO OO HABOON.....	18
QIYAASTA ANSHAX-MARINTA KHAMRADA/DAROOGADA .....	19
Qoraalo dheerada .....	20
Nidaamyada Eryidda .....	20
Nidaamyada Cayrinta .....	22
Anshaxa Ardayda Laxaadka La' .....	22

Dugsiyada Dadweynaha Portland waxay aqoonsan yihiin kala duwanaanta iyadii oo la tixgelinayo dhammaan ashkhaasta iyo kooxaha qeybta ay ku leeyihiin bulshada. Ardayda oo idil waxay xaq u leeyihiin inay nabad ku dareemaan dugsiyadooda si ay ugu aflaxaan waxbarashadooda iyo ta bulshadaba. Marnaba lama ogola in goobaha shaqada lagu midab-takooro, bahdilo shakhsiyaad ama kooxo iyadii oo ku qotonta da', midab, iimaan, itaal-daro, xaalada guur, uu u dhashay, asalka uu ka soo jeedo, isir, diin, jinsiga ama nooca jinsi ee uu qofkaasi, barnaamijyada waxbarasho, hawlaha ama shaqada.

Buug-yarahan waxaa sidoo kale laga heli karaa dugsiigaaga isagoo ku qoran afafka: Isbaanishka, Ruushka, Fiitnaamiiska, Shiinaha, iyo Soomaaliga. Wixii gargaar dheeraada ee la xiriira af-celinta ama turjumaanka luqadaha, fadlan wac 503.916.3427.

Qoraalo dhammeystiran oo ah siyaasadaha iyo tilmaamaha maamul ee Dugsiyada Dadweynaha Portland iyo waliba Xeerasha Maamul waxaad ka heli iyagoo online ah.

## **Doorka iyo Masuuliyadaha**

Ardayda Dugsiyada Dadweynaha Portland waxa laga filayaa in ay ahaadaan kuwo nabad ah, ixtiraam leh oo masuul ah.

Ardayda waxa laga filayaa in ay u dhaqmaan hab u saamaxaya macalimiinta in ay wax baraan oo Ardayduna wax barato.

### **ARDAYDA**

#### **Arday ahaan, waxaad xaq u leedahay in aad:**

- Kala hadasho macalimiinta, la-taliyaha iyo shaqaalaha kale wixii aad ka welwel qabto oo idil.
- Hesho edbin(anshax) cadaalad huwan oo aan lahayn takoor.
- Soo sheegto wixii dhacdooyin ah ee hadidaad, dhibaateyn, xad-gudub ama hanjabaad af ah ama gacan ka hadal ah.
- Heli karto xogaha macluumaadkaaga, iyada oo ku haboon xeerarka dejisan.
- Ku heli karto macluumaadka anshax-marinta luqad aad fahmi karto.

#### **Arday ahaan waxay masuuliyadaadu tahay in aad:**

- Si joogta ah dugsiga u timaado, oo ku timaado waqtigiisa, soo qaadato qalabkii haboonaa, oo u soo diyaar garowdo in aad ka qeybqaadato fasalka iyo shaqada waxbarasho.
- Sameyso sidaada ugu fiican.
- Ixtiraamto xuquuqaha, dareenada, iyo hantidada Ardayda kale, waalidka/daryeelaha, shaqaalaha dugsiga, martida, iyo dariska dugsiga.
- Ku dhaqanto anshax fiican inta aad ku sugan tahay dhismaha dugsiga, basaka dugsiga, meesha basku istaago, iyo hawlaha la xidhiidha dugsiga, iyo fasalada dhexdeedo sidaa awgeed aanad faragelineyn wax barista iyo barashada.
- U hoggaansanaato xeerasha fasalka, dugsiga iyo Degmada.
- Soo sheegto xadgudubyada sharciyada.

## WAALIDIINTA/WAKIILADA

### **Waalidkaaga/wakiilkaagu waxay xaq u leeyihiin in uu:**

- Si joogta ah u helo warbixinta horumarka waxbarashada iyo xaadiraada.
- Sameeyo talooyin oo wax ku biiriyo qorshaha waxbarashadaada.
- Ka qeybqaato kulanka macalimiinta iyo/ama maamulaha.
- Ka helo farisaad macalimiinta derejooyinkaaga.
- Heli karo xogaha macluumaadkaaga, iyada oo ku haboon xeerarka dejisan.
- Helo faahfaahin dheeraada xagga xuquuqda, masuuliyadaha iyo anshaxa Ardayga.
- Ku heli karo macluumaadka anshaxa luqad uu fahmi karo.

### **Waalidkaagu/wakiilkaagu wuxuu leeyahay masuuliyad in uu:**

- Ku gargaaro shaqaalaha dugsiga wadaagista ra'yiga si loo hagaajiyo waxbarashada iyo ka hortagga ama xalinta dhibaatooyinka anshaxa ee Ardayga.
- Ilaaliyo fayyo-qabka caafimaadka, jidhkaaga iyo niyadaada iyo waliba xaadirida dugsiga ee joogtada ee toosan.
- Hubi in xaadiraankaagu in uu yahay joogto adigoo sidoo kale ku wargelinaya Dugsiga iyada oo faahfaahsan sababta maqnaanshahaaga ama daahitaankaaga.
- Yimaado/ka-qeybqaato kulanada waalidka.
- Gargaaro xoojinta u hoggaansanaanta Ardayga ee xeerarka dugsiga.
- Bixiyo ka warheyntaada haboon ka hor iyo ka dib dugsiga.
- Dib kuula eego kalana hadlo xuquuqda, masuuliyada iyo anshaxa Ardayga.
- Taageero barnaamijyada is-anshixinta iyo xallinta khilaafaadka.

# Xuquuqda

## IYO MASUULIYADA

### **Xaadirida**

Ardayda waxa laga filayaa in ay si joogto ah u yimaadaan dugsiga waqtigiisa. Waalidiinta/wakiilada ayaa sharciyan ka masuul ah in ay caruurtooda keenaan dugsiga.

Waalidka/wakiilku waa in ay wargeliyaan shaqaalaha dugsiga maqnaashaha iyo/ama daahida Ardayga iyagoo soo diraya qoraal, email, fax, ama fariin telefoonka uga tegaya ama fariin. Maqnaanshaha soo socda ee ah waa la ogol yahay haddii waalidka/wakiilku soo wargeliyaan shaqaalaha dugsiga:

- jirada Ardayga,
- jirada qoyska ee u baahan joogitaanka Ardayga,
- fasaxyada la xidhiidha diinta,
- dhimasho ku timid qoyska,
- ballan hore oo dhakhtar ama dhakhtarka ilkaha.

Qoraalka waa in la diraa (3) maalmood gudahood laga bilaabo maalintii maqnaanshaha oo ay ku taalo:

taariikhda,  
magaca Ardayga,  
sababta maqnaanshaha, iyo  
saxiixa waalidka/wakiilka.

Marka loo baahdo in waalidka ama daryeelaha ay rabaan inay qaadaan caruurtooda ka hor waqtiga dhammaadka dugsiga waa in ay yimaadaan xafiiska dugsiga. Xafiisku uma sii dayn doono Ardayna qof aan ku jirin warqadda xaaladaha degdega ah ee Ardayga. Haddii ay waalidiintu/daryeelayaashu ay soo diraan qof kale si uu uga qaado dugsiga, waa in ay jirtaa qoraal horay loo dhigay oo yaala xafiiska dugsiga.

Ardaydu waa in ay qabtaan dhammaan shaqadii ka baaqatay oo lagu siin doono derajo qabashadeeda shaqada baaqatay ee lahayd cudur-daarka maqnaanshaha.

Sharciga Gobolku ayaa k araba dugsiyda in ay ka saaraan Ardayda maqnaata toban (10) maalmood oo isku xigta sababtay doonta ha ahaatee.

### **Kahor iyo Ka dib Dugsiga**

Ardayda waxaa talaabo xagga anshaxa ah laga qaadi karaa hab-dhaqan aan fiicneyn oo ay sameeyaan marka ay dugsiga ku soo socdaan am ka sii baxayaan mudo cayiman. Hase ahaate, shaqaalaha dugsigu kama mas'uul ah Ardayda edebtooda iyo ammaanka Ardayda lugta ku socota min guriga ilaa dugsiga kahor iyo kadib saacadaha dugsiga ee la shaaciyey.

## Basaska

Gaadiidka baska ee dugsigu waa fursad mudnaan leh, oo uu Ardaydu ku hanan karto inay ahaadaan ammaan, ixtiraam iyo masuuliyiin.

Haddii Ardaygu baska u raaco min guriga ilaa dugsiga, waa in uu u hoggaansamo xeerasha baska. Anshax-xumada baska gudihiiisa iyo meelaha basku istaago waxa eegi doona shaqaalaha maamulka dugsiga. Ardaygu wuxuu waayi karaa mudnaantaas bas raacida haddii ay timaado edeb-daro soo noqnoqata ama ku xadgubida xeerasha baska.

Gobolka Oregon wuxuu leeyahay xeerar qabanaya Ardayda baska raacda. Xeerashaasi waxay ku yaalaan dhammaan basaska dugsiyada.

### AMAAN AHOW

- MAYA dirir, ledgin, ama anshax qalafsan.
- Maya qori, hub, ama alaab khatar keeni karta.
- Hage la aqoonsan yahay iyo xayawaanka gargaarka oo kaliya ayaa lo ogol yahay baska.
- Fadhi inta basku socdo.
- Ka talaab baska hortiiisa ama meelaha dirawalku cayimo markaad baxayso.
- Gacmaha, madaxa iyo lugaha ku daa baska gudihiiisa mar kasta.

### IXTIRAAM YEELO

- Ardaydu waxay ka amar qaadnayaan dirawalka.
- Dirawalka ayaa cayimi kara kuraasta haddii loo baahdo.
- Hoos u hadal (maya qaylo iyo afxumo).
- Weydii dirawalka ruqsad kahor furitaanka iyo xidhitaanka dariishadaha.
- Basku ku daa nadiif hana waxyeeleyn.
- Maya cunto ama cabitaan.
- Ixtiraam dirawalka, Ardayda iyo dadka baal maraya.

### MASUUL NOQO

- Adeegso albaabka xaalada degdeg marka xaalad degdegi ah jirto.
- (5) daqiiqo kahor waa inaad ku soo sugto meesha basku istaago intaanu iman kahor.
- Xeerasha Baska waxa lagu dabiqi meelaha basku istaago.
- Si uu Ardaygu meel kale ugu dego wuxuu u baahan yahay ogolaansho qoraal ah.

**Ururada, Ka-qeybqaadashada Ardayga**

Urur waa koox Arday ah oo si joogta ah ukulma, wadaaga dano guud, am araba in ay qabtaan adeeg. Ururka waa inuu kormeero qof weyni oo amar ka haysta Maamulaha oo u furfuran Arday kasta.

Gaadiidka Ardayda ka qeybqaata ururka ee kulma kahor ama ka dib dugsiga waa masuuliyada waalidka/wakiilka.

Ardayda waxaa lagu dhiirigelinayaa inay ka qeybqaataan addeegyada lagu kobcinayo dugsiga gudahiisa jawi fiican. Waxa kale oo lagu martigelinayaa in ay kala hadlaan maamulaha iyo maclimiinta arrimaha dugsiga iyo go'aan qaadashada iyo waliba xallinta khilaafaadka.

Dugsiyo dhowra ah ayaa leh barnaamijyo ciyaaraha ee dugsiga ka dib. Naadiga ciyaaruhu ma ayidin hawlaha ama marti-gelin Dugsiyada Dadweynaha Portland. Ka qeybqaadashada naadiga ciyaaraha dibada dugsiga lagu qabto ama maalmaha iyo xilliga dugsiga waa masuuliyada gaarka ah ee Ardayga, qoyska, iyo naadiga marti-geliyey, mana ah masuuliyada Dugsiyada Dadweynaha Portland.

**Ixtiraamka Bulshada, Masuuliyadda**

Markay u socdaan ama ka imanayaan dugsiga ama sugayaan baska, Ardaydu waa inay dhawraan xuquuqda iyo hantida daka kale. Waa in ay ku tuurin dhulka waraaq ama qashin. Ardaydu waa in aanay waxyeeleyn hantida kasta.

**Nidaamka Cabashada – Ardayga iyo Waalidka, Wakiilka**

Haddii fasalka dibadiisa dhibaato ka dhacdo, Ardayda iyo waalidka/wakiilka ayaa la hadli kara macalinka, la-taliyaha, ama maamulaha. Haddii dhibaato la xidhiidho fasalka, waxa lagu dhiirigelinaya Ardayga ama waalidka/wakiilka in uu la hadlo marka hore macalinka. Haddii ay talaabadiisa xalin weydo dhibta, waxay codsan karaan inay la kulmaan maamulaha. Haddii kulankaasi xalin waayo dhibta maamuluhu wuxuu u soo-jeedin doonaa waalidka/wakiilka talaabooyin dheeraada oo ay qaadi karaan si ay u xaliyaan xaalada.

**Labiska iyo Is-qurxinta**

***Mas'uuliyadda ee dharka iyo hagaajinta ardayga ku dul ugu horrayn la ardayga iyo waalidiinta ama masuulka isaga ama iyada.***

**Dharka la ogolyahay iyo Qurxinta**

- Ardaydu waa inay xirtaan dhar ay ku jiraan labada shaati la surwaal ama darafkii, ama wax u dhigma iyo kabaha.
- Funaanadaha la iyo dharka waa in ay haystaan dhar ku hor iyo dhinacyada.
- Dharka waa qarín, dhexda iyo Xarkaha rajabeeto saaray.
- Fabric oo daboolaya dhamaan qaybaha gaarka loo leeyahay waa in aan la arki marayo.
- Koofiyadaha iyo madax gashiga kale waa in wajiga in ay la

arki karo iyo faragelin kuma khadka araggooda arday kasta ama shaqaalaha. Wata waa in ardaygu wajiga iyo dhegaha in ay arki karo in ay shaqaalaha.

- Dharka waa in ay ahaadaan ku haboon dhamaan hawlaha fasalka loo qorsheeyey oo ay ku jiraan waxbarashada jirdhiska, shaybaaro saynis, dukaan qoryo, iyo hawlaha kale ee ay khataraha gaarka ah ka jirin.
- Koorsooyin khaas ah u baahan yihiin waxaa laga yaabaa in ay xidhato khaas ah, sida dharka ciyaaraha ama qalabka nabadgelyada.

### **Dharka iyo Qurxinta in lama oggola**

- Dharka laga yaabaa in aan u muujinayaa, xayaysiiya ama doodo isticmaalka khamriga, tubaakada, marijuana ama walxaha kale ee ay gacanta ku hayso.
- Dharka laga yaabaa in aan u muujinayaa qaawan, wanaan ama falalka galmada.
- Dharka laga yaabaa in aan isticmaalno ama u muujinayaa hadallada naceybka ah ee lagu beegsanayo kooxaha ku salaysan jinsiyad, qowmiyad, jinsiga, nooca galmada, aqoonsiga jinsiga, diinta ama wax kasta oo kooxaha kale ee la ilaaliyo.
- Dharka, oo ay ku jirto aqoonsiga baandooyinka, waa in aan hanjabo caafimaadka ama badbaadada ardayga ama shaqaalaha kale ee kasta.
  - Haddii ay xidhato ardayga ama duyaarin oo halis ku ah caafimaadka ama badbaadada qof kasta oo kale, ka dibna edbin waayo, dharka ama qurxinta xadgudubyada waa in lagu saxo nidaamka anshaxa xadgudubyo la mid ah.

### **Daroogada iyo Khamriga**

Ardaydu waa in aanay isticmaalin, sameyn, ama iibin/kala-wareejin khamri ama daroogo, ama kale oo u eg sida daroogada dugsiga gudahiisa, garoomada dugsiga, ama saacadaha dugsiga. Ardayda akhlaaqdoodu muujiso in ay darooga ama khamri qaateen waa la edbin doonaa.

### **Ujarada iyo Ganaaxa**

Ujro ma laha barnaamijka waxbarashada aasaasiga ahi. Hase ahaatee, waxa jira jiri kara ujro saaran safarada dibeda iyo ciyaaraha. Qoysaska dhibaataadu ka haysato dhaqaalaha, waa in ay la soo xiriiraan dugsiga si loogu sameeyo qabanqaabo qarsoodi ah.

Ganaaxa ayaa la saari doonaa buugaagta lunta ama wax noqota ama qalabka dugsiga. Xogta macluumaadka dugsiga iyo dhibcaha ayaa la hakin doonaa ilaa inta la bixinayo.

### **Badbaadada**

Gobolka Oregon waxa uu leeyahay sharciyo adag ee la xidhiidha



**Raashinka**

isticmaalka iyo diyaarinta raashinka ee goobaha dadweynaha sida dugsiyada. Cuntada fasalka waxaa loola macaamil sidii ay kaliya yihiin kuwa ganacsi loo diyaariyey. Raashinku waa in uu noqdaa mid loo soo qaabeeyey xidhmooyin gooni ah iyadii oo ay reeban tahay in Ardaydu dhexdooda wadaagaan. Ardaydu ma wadaagi karaan raashin ay qado ahaan uga soo qaateen oo ay kala yimaadeen guryahooda.

**Xorriyada Hadalka iyo Kulanada**

Inta ku xeeran sharciga gobolka iyo ka Dawlada dhexe, siyaasada Degmada, iyo nidaamyada deggan ee dugsiya Ardaydu waxay haystaan xorriyada hadalka iyo kulanada sida ku qoran Bedelka Koowaad (the First Amendment).

**Cago-jugleyn, Dhibaateyn, Duleyn , Dhibaateynta Galmada**

Ardaydu dhammaantood waxa ay xaq u leeyihiin in ay nabad ku dareemaan dugsiyadooda si ay ugu gaadhaan aflax xagga waxbarashada iyo bulshadaba ah, iyadii oo aan loo eegeynin isirka, jinsiga, diinta, itaal-daro, dalka uu ka soo jeedo, xaalada guurka, nooca jinsi ee uu la hayo, aqoonsiga nooca jinsi, ama kala duwanaanshaha kale. Bahdilaada, rabashada, khiyanada, waxyeelo, ama waxyeelo xagga jirka ah ee Arday ama shaqaale ama qof hantidiisu waa reeban tahay. Rabashado xagga jinsiga la xidhiidha nooc uu noqdaba waa fal aan soo dhaweyn lahayn, marka lagu daro afka oo aad kaga dhawaaqdo ama iyadii oo gacan qaad ah iyaduna waa ay reeban tahay. Ardaydu waa in ay wargeliyaan hawl-wadeenada dugsiya fal walba oo nocyadaas la soo sheegay la xidhiidha.

**Adeegsiga Internet-ka**

Adeegsiga Internet-ka dugsiya dhexdiisa, Ardaygu waa in uu haystaa saxiixa waalidka/wakiilka ee Foomka Diiwangelinta Ardayga. Ardayda isticmaasha internet-ka waa in ay raacaan xeerka oggolaanshaha internet-ku PPSNet oo lagu soo diro baqshada diiwaangelinta ilaa guriga oo laga heli karo dugsi kasta.

Xeerarku waxay ka hadlayaan:

- ammaanka qofeed,
- dhaqdhaqaaqyada burburinta ee mamnuuca ah,
- badbaadada(nabadgelyada),
- akhlaaq aan habooneyn,
- ixtiraamka keli-ahaanshaha,
- qishka (tuugada fikirka),
- xuquuqda daabacaada, iyo
- waxyaabaha iyo bogaga mareegaha internet-ka ee aan habooneyn.

Ardaygii jabiya xeerarku wuxuu lumin karaa mudnaanta adeegsiga internet-ka oo uu heli wuxuuna heli karaa talaabooyin anshax marin ah.

**Lumis, Xaditaanka,  
Waxyeeleynta  
Hantida**

Degmadu ma bixiso ama ma mag-dhabto hantida lunta, la xado, ama wax loo geysto dugsiga gudhiisa. Alaab oo dhan oo ay ka mid yihiin elektroonik, baaskiilado, iyo boodhadhka sil-bada(skateboards), waxa dugsiga lagu keena dumadda qofka iska leh. Sanduuqyadu ma aha meelo ammaan ah oo lagu kaydsan karo alaabooyinka qiimaha leh.

**Daawada,  
Xaaladaha  
Caafimaad ee  
Degdega ah**

**Daawada**

Haddii Ardayga ay tahay inuu qaato daawo dugsiga dhexdiisa, waalidka/wakiilku waa inuu marka hore u geeyo Maamulaha. Maamulaha ayaa sharxi doona xeerka oo qabanqaabin doona xubin ka mid ah shaqaaluhu inuu siiyo Ardayga daawada. Dawo kasta waa in ay ku jirto weel calaamadsaysan. Ardayda waxa loo ogol yahay inay dawada qaataan xaalado gaar ah markay jiraan laakiin waa in marka hore lala socodsiiyo Maamulaha.

**Xaaladaha Caafimaad ee Degdega ah**

Gargaarka caafimaadka, sida loogu baahan yahay, waxa amri doona dugsiga oo u dhiibi doona kharashka waalidka/wakiilka.

**Qishka, Khayaanad  
a**

Ardaydu kama qaadan karaan nuqul qof kale shaqadiisa qoran ama mashruuc dhan ama khayaano imtixaan iyo hawl kale oo dugsi.

**Waxyaabaha  
Mamnuuca ah**

Ardaydu kuma haysan karaan dugsiga waxyaabo khatara ama waxyaabo dugsiga ka mamnuuc ah, ama hawlaha dugsiga oo ay ka mid yihiin:

- hubka halista ah ama dilaaga sida mindiyaha, ama wixii kale ee qof amah anti waxyeeleyn kara;
- wax alla wixii u eg hub;
- waxyaabaha qarxa, oo ay ku jiraan rashka, rasaasta, qumaca;
- gaasaaska(hawooyinka) waxyeelada leh;
- sunta;
- khamriga, buuriga, oo ay ka mid yihiin sigaarka elektariga ah ama qalabka kale ee la isagu gudbiyo sigaarka; qalinka sigaarka ee la nuugo ama qalab uumiga bixiya, iyo daroogooyinka kale mamnuuca ah;
- wixii loo adeegsado gaaduud, iib, ama adeegsi darooga mamnuuca oo ay ku jiraan wiciyada, kabriid iyo qaraxada;
- hanti la soo xaday;
- labis muujinaya xubnimida qawleysato ama dhaqdhaqaaq;
- wax kasta ooo midab-takoor ah, diin ama gef galmo; wixii kale ee xeerarka dugsigu ay mamnuuceen.

Waxyaabaha la mamnuucay waa laga qaadi waxaana hayn doonaa shaqaalaha dugsiga, ka dibna waxa kaliya oo loo dhiibi doonaa waalidka Ardayga. Waxyaabaha sharci darada ah waa la baabi'in doonaa ama Booliiska ayaa hayn doona. Waxyaabaha la xaday waxaa loo celin qofkii lahaa ama Booliiska.

**Baadhitaanka –  
Sanduuqyada iyo  
Baadhitaanka  
Ardayga**

Dugsigu wuxuu baadhi karaa Ardayga haddii dugsigu qabo tuhun caqli-gal in waxyaabo mamnuuca ama halisa laga helayo. Shanadadaha dhabarka, boorsooyinka, sanduuqyada, miisaska iyo meelaha kale ee ay Ardaydu wax dhigtaan waa hantida dugsiga, oo waxay hoos yimaadaan xukunka dugsiga oo waxa laga fatishi karaa waxyaabo mamnuuca ama halisa waqti kasta. Keliya waxyaabaha Ardaygu uga baahan yahay shaqada dugsiga iyo wax –qabadyada dugsiga ayaa lagu kayd in karaa meelahaas.

**Macluumaadka  
Ardayga**

Dugsigu waa uu keydin doonaa sooyaalka Arday walba. Kuwani waa sooyaalka Ardayga ee horumarka akadeemiyadeed, hab-dhaqanka Ardayga iyo macluumaadka kale ee la xidhiidha Ardayga, sooyaladaasi waa qarsoodi.

Sooyaalka Ardaygu waxa uu siinayaa macluumaad shaqaalaha dugsiga iyo waalidiinta/daryeelayaasha.

Waalidiinta/Daryeelayaasha waxa ay leeyihiin xuquuq tan la xidhiidha sooyaalka Ardayga, marka lagu daro xuquuqda dib-u-eegista sooyaalka Ardayga iyagii oo codsan kara in wax laga bedelo sooyalada, waxay mar walba wixii su'aalo ah ee ay qabaan ula tegi karaan maamulaha.

**Ka Shaqaaleynta Ciidamadda.**

Shracigii Ardayga Yaan Aqoon Daro Looga Tegin ee 2001<sup>dii</sup>, waxa uu ka doonayaa dugsiyada degmada in ay bixiyaan magacada, cinwaanada iyo lambarada telefoonka ee Ardayda heerka dhexe iyo kuwa ku jira heerka dhammaadka sababtoo ka shaqaaleynta ciidamada kuliyadaha ama jaacamadaha markii la codsado.

Wxii macluumaad dheeraad ah ee khuseeya Ardayga iyo awooda aad u leedahay in aad “iska fogeeyso” bixinta sooyaalka Ardayga la hadal hawl-wadeenada xafiiska dugsigaaga.

**Imtixaanka,  
Qiimeynta**

**Imtixaanka**

Dhammaan Ardayda fasalada 3aad ilaa 8aad, iyo kuwa ku jira kan tobnaad, waxa lagu imtixaamaa xisaabta iyo akhriska waqtiga dayrta. Imtixaanadu waxay ka yimaadaan Waaxda

Waxbarashada ee Oregon oo loo adeegsado dugsi kasta oo ku yaal gobolka. Qorista, furfurista layliyada xisaabta, iyo sayniska iyana waa lagu imtixaamaa, laakiin waa fasalada qaarkood. Siyaabo badan oo wax loo intixaamo ayaa jira si dhammaan Ardaydu oo ay ku jiraan kuwa laxaadka la' loogu imtixaami karo heerkooda ku haboon. Waalidka/wakiilka ka waba su'aal barnaamijka imitixaanka waa inuu kala xiriiraa Maamulaha wixii macluumaad dheeraad ah.

### **Qiimeynta**

Degmadu waxay leedahay “Baaris Ubad” ee joogteynaya caddeynta, xadidida iyo qiimeynta dhammaan Ardayda deegaanka ee u baahi qaba waxbarashada gaarka ah iyo addeegyada la xidhiidha, ama u qabashada fasalada guud ee waxbarashada. Waalidka waxaa suurtagal ah in ay codsadaan in degmadu qiimeyso ubadkooda si go'aan looga gaaro xuquuqda uu u yeelan karo addeegyada waxbarashada gaarka ah. Qorshaha Qeybta 504, Ardayda maskaxdoodu sareyso iyo kuwa hibadada la siiyey, iyo/ama Bartayaasha Luqada Ingiriisida ama Barnaamij Luqadeedka Ingiriisida ee aan Luqadaada Koowaad ahayn. Degmadu way aqbali kartaa in ay qabato qiimeynta ama ay diido iyada oo u gudbin doonta waalidka wargelinta diidmaddaa.

### **Hadidaad**

Marka Arday hadiddo si ay ku jirto gacan ka hadal ama waxyeeleyn, maamulku waxay tixgelin iyaga oo meel marinaya mid ka ah waxyaabaha soo socda:

- a. in sida ugu degdeg badan ay uga saaraan fasalka Arday kasta oo hadidda Arday kale inuu dhaawac gaadhsiiyo ama six un waxyeelo u gaadhsiiyo hantida dugsigu.
- b. In Ardayga la geeyo meel akhlaaqdiisa wax lagaga qabanayo sida ugu dhakhso badan, oo ay ka mid tahay, inkastoo aysan ku koobneyn, xafiisyada maamulaha dugsigu, maamule-xigeenka dugsigu, kaaliyaha maamulaha dugsigu, la-taliyaha ama shaqaale dugsigu ee Cilmi-nafsiga sitana liisanka Heerka Macalinka ee Guddida Ku Dhaqanka ama qof ka haysta liisanka xafiis aqoonta caafimaadka maskaxda ah.
- c. In dugsigu helo qiimeynta Ardayga inta aan Ardaygu ku noqon fasalka kaasi oo uu sameeyey xirfadle haysta liisanka caafimaadka maskaxda. Ardayga looga saaray fasalka si loo qiimeeyo waa in aanu ka maqnaan fasalka wax ka badan 10 maalmood oo maalmaha dugsigu ah haddii uunsan maamulka

keenin in aan lagu dhammeystirin karin qiimeynta waqtigaas. Maamulku waa in ay xidhiidh la sameeyaan Waaxda Addeega Ardayda si ay uga gargaaraan nidaamka. Waaxda Addeega Ardaydu waxay sii wadi taageeradii qandaraaska xirfadlayaal haysta liisanka caafimaadka dhimirka si ay u sameeyaan qiimeynta.

Maamulku waa in sida ugu dhakhso badan, laakiin aysan ka dambeyn 24-ka saacadood gudahood ee dhacdadu dhacday, la wargeliyaa waalidka ama wakiilka sharciga ah anshaxa Ardayga iyo jawaabta uu dugsigu ka bixiyey.

Degmadu waxay diyaarin ku-talo-gal adduun ee lagama maarmaanka u ah si loogu fuliyo sharcigan maamul.

### **Buuriga(Tubaako)**

Ardayda iyo dadka waaweyn looma ogola in isticmaalaan, haystaan, iibiyaan, kala wareejiyaan wax ka sameysan buuri ama buuri/nikotiin ama agab kaledhismayaasha dugsiga, hantida dugsiga, baabuurta dugsigu gaadiid ahaan u isticmaalaan iyo shaqooyinka la xidhiidha dugsiga, sidoo kalena hawlaha shaqo ee la xidhiidha dugsiga.

### **Hubka**

Hubka waa ka mamnuuc gudaha ama agagaarka dugsiyadeena. Ardayduna ma haysan karaan ama isticmaali karaan qoryo, ama mindiyo ama wax kasta oo u eg ama loo addeegsan karo hub ahaan dugsiga. Lama ogola ereyo ama ficilo lagu handado ama lagaga cabsiiyo dadka kale-xitaa haddii aad ciyaareyso ama saaxiibo.

Sharciyada dawlada dhexe iyo kuwa gobolku waxay leeyihiin Ardayda la timaado hub dugsiga waa in laga eryaa dugsiga hal sano oo sanad-dugsiyeedka dugsiga ah.

# Anshaxa

## IYO NIDAAMKA

Shaqaalaha dugsiga iyo waalidka/wakillku waxay wadaagaan masuuliyada dhiirigelinta akhlaaqda haboon ee Ardayda. Shaqaalaha dugsiga waxaa laga rajeynayaa in ay sii wadaan farogelinta tabanee dhinaca akhlaaqda ah, istaraatiijyado iyo waliba taageerida in la baro, lagu dhiirigeliyo iyadoo la xoojinayo anshax caawinaya goobta waxbarashada.

Shaqaalaha dugsiga waxa laga rajeynayaa in ay hore ku sameeyaan farogelin iyagoo ku bilaabaya nidaamka anshax ee ugu hooseeya heerkiisu suurtagal caqli-galka ah, lana xisaabiyey inuu isbedel ku sameeyo akhlaaqda Ardayga iyadoo hoos loo dhigayo in ay ka lunto waqtigii uu wax baran lahaa. Intaas waxaa dheer, Shaqaalaha Degmadu waa inay tixgelin siiyaan dhammaan wixii kale ee la sameyn karayo ee suurtagal ah, iyadoo diirada la saarayo ugu horeyn qoyska iyo wixii agab ah ee dugsigu leeyahay kuna saleysan arrintan marka Ardayga la barayo waxa laga rajeynayo iyo jawaabta laga bixiyo akhlaaq xumada.

Hab-dhaqanada(dabeecadaha) qaarkood waa ka mamnuuc dugsiga iyo goobaha ay ka socdaan hawlaha dugsigu.

Hab-dhaqanka Dugsiyada Degmadu ay ka rajeynayaa waxa lagu dabihi karaa Ardayda mar kasta oo ay:

- joogaan dugsi kasta ama hanti ay leedahay Dugsiyada Degmadu;
- hawl kasta oo uu marti-geliyo dugsigu, iyadii oo aan loo eegeyn goobta ay ka dhacayso, marka lagu daro arrimaha xagga safarka sii socod iyo soo socod waqti xadidan oo maangal ah;
- u kala socdaalida dugsiga sii socod iyo soo socod sida u ku cad dukumentiga qaybtiisa “Kahor iyo Kadib dugsiga;
- ka qeyb-qaadashada (iyadoon loo eegeyn in ay ka maqan yihiin dugsiga ama hawlgalo ay martigelisay cid aan dugsiga ahayn) taasi oo xiriir toos ah la leh amniga dugsiga ama daryeelka; ama
- ka-qeyb-qaadashada barnaamijyada ciyaaraha ee Degmada, marka xeerasha la dhaqan-gelinayo yihiin dhammaan inta lagu gudo jiro wareega ciyaaraha- todoba (7) maalmood todobaadkii, 24 saac maalintii, goob kasta ha ahaatee.

Tusaalayaasha anshax-xumada:

- ka hor-joogsado Ardayda kale waxbarashada,
- isticmaalka af-xumada iyo cayda,
- haysashada iyo isticmaalka buuriga, khamriga iyo daroogada

- kale ama buuri/qalabka darooga lagu adeegsado,
- dirirtu noocay doonto ha noqotee,
- keenista dugsiga hubka ama wixii kale ee u eg,
- tuugada ama waxyeelaynta hantida,
- hantidaada, dhibaataaynta, ama cago-jugleynta Ardayda ama shaqaalaha,
- xidhashada labis muujinaya xubnimada qawleysato ama dhaqdhaqaaq, ama
- diidmada u-hogaansanaanta amarada.

**Heerarka  
Anshaxa**

**Ka-hortaga iyo Cawaaqibka Anshaxa oo Kooban**

Waxa jira tiro doora ah oo cawaaqibka anshax-xumada Ardayga Heerarka Tallaabooyinka:

Heerka 1 Kulano

Heerka 2 Ka reeban Wax-ka-qabad = joojinta maadooyinka dheeriga ah, biririfta, xayiraad, iwm.

Heerka 3 Eri/Ka saarid, Ka saarida dugsiga gudahiisa Dib-u-soo-cayimid, Gudbin iwm.

Heerka 4 Cayrin/Cayrin dib loo dhigay/Dib-u-soo-cayimid/Tilmaamid

Heerka 5 Cayrin Khasab ah

Heerka 6 Cayrin Hal Sano oo Khasab ah

Sida uu dhigayo Sharciga Gobolka Oregon – HB 2192, ka hor intaan la eryin ama la cayrin, shaqaalaha dugsigu waa in ay tixgeliyaan:

- Xaalada dhabta ah ee anshax-xumada.
- Da'da Ardayga, caafimaadkiisa, iyo laxaad la'aantiisa ama xaalada waxbarashadiisa gaarka ah.
- Qodobada dhaqanka ama luqadu in ay door ka ciyaareen anshax-xumada.
- Haboonaanta meeleynta waxbarashada Ardayga.
- Ardayga anshax-xumadiisii hore iyo diiwaanka akhlaaqdiisa.
- Nidaam gargaara oo loo heli karo Ardayga.
- Rabitaanka Ardayga ee ah inuu dib u saxo dhibkiisa.
- Raadka ay ku reebeyso dhacdadu guud ahaan bulshada dugsiga.
- Helitaanka barnaamijyada ka-hor-taga iyo guda-galka kuwaasi oo loo habeeyey sidii anshax-xumada wax loogaga qaban lahaa.
- Haddii uu Ardaygu ikhtiyaarkiis uu soo bandhigay anshax-xumada.

Marka la soo rogo saarida ka baxsan dugsiga waxaa loo baahan yahay in la qaado talaabooyinka si la hortago soo noqoshada habdhaqanka taasi oo keenaysa saarida ka

baxsan dugsiga iyo ku soo laabashada ardayga goobaha fasalka sidaas darteed dhibaataada waxbarshada ardayga waa loo soo yareeyay.

Iyada oo la waafajinayo qodobka 4.30.020-AD Niyaamyada Anshaxa Ardyaga:

**Istimaalka ka cayrinta waa inay xadidnaataa:**

- Hab-dhaqanka keena handidaada caafimaadka iyo badbaadada ardayga ama shaqaalaha dugsiga; ama
- Marka istrajiyadaha kale ay beddelan hab-dhaqanka ardayga waxay yihiin kuwa aan waxtar laheyn; ama
- Oo ay ku jirto hawlgalada xeerarka degmada iyo siyasadaha iyo sharciga Gobolka.

Ardayga **Fasalka shanaada ama ka hooseya**, isticmaalka saarida dugsiga ama cayrinta way xadidantahay. Tallaabada anshaxa Heerka 3 ama sare ee ardayga ku jira fasalka shanaad ama ka hooseya waa inuu ogaansanaada Sharciga Gobolka SB 553 iyo siyaasadda Degmada.



### Akhlaaqda Laga Rajeynayo iyo Natiijooyinka oo Kooban

<b>Tusaalayaasha akhlaaqda xadgudub ku ah waxa laga filayo</b>	Qeexitaan	Dhacdada	Heerka Anshaxa yar— weyn
<b>XAADIRITAANKA IYO IMAANSHAHA WAQTIGII LA RABAY</b>			
<b>Goysmada Fasalka/ Ka Bixida Ogolaansho La'aan</b>	Baaqsiga fasalka iyada oo aanad haysan ogolaansho ama cudur-daar; dhismaha dugsiga oo aad ka baxdo, fasalka ama meel gaar ah oo lagu qoondeeyey iyada oo aanad ogolaansho ka helin macalin iyo/ama maamulka.	Yar/Kow Culus/Rep	1 — 2 2 - 3
<b>Baashaal</b>	Iska joogto dhismaha dugsiga ogolaansho la'aan iyadoon shaqaaluhuna ka warheyn ujeedooyinka aan ka ahayn waxbarasho.	Yar/Kow Culus/Rep	1 — 2 2 — 3
<b>Aan La Dhaafi Karin</b>	Galitaan goob ka mid ah dhismaha ama meel kasta oo hantida dugsiga iyadoo aan la ogoleyn in Ardaydu isticmaasho ama ay ka soo galaan goobtaas waqtiyo ka mid ah maalintii.	Yar/Kow Culus/Rep	1 — 2 2 — 4
<b>Daahida</b>	Ka baaqsada in aad joogto goobtii waxbarashada ee waqtigaa lagugu inaad joogto.	Yar/Kow Culus/Rep	1 — 1 2 — 3
<b>Gelitaanka Ogolaansho la'aan</b>	Gelitaanka dugsiga kasta ama qeyb ka mid ah dugsiga adigoo fasax uga haysan masuuliyiinta; saacadaha dugsiga furan yahay; oo ay ka mid tahay gelitaanka dugsiga mar kast waqtiga uu ku gudo jiro eriga ama cayrinta.	Yar/Kow Culus/Rep	1 — 3 3 — 4
<b>Maqnaasho</b>	Ka baaqsiga in aad wargeliso dugsiga iyadoon aanad haysan ogolaansho ama cudur-daar.	Yar/Kow Culus/Rep	1 — 2 2 --- 3
<b>ILAALINTA HANTIDA</b>			
<b>Dabka</b>	Ficil sababi kara dab, laakiin natiijo la'aan ah, sida in lagu tuuro dabka kabriidka goobta qashin-qubka taasina oo aan dab ka kicin ama si ula kac ah dab loo shido ama gubida hantida dugsiga iyadoo loo eegayn in uu wax khasaare geystay.	Yar/Kow Culus/Rep	3 — 4 5
<b>Hanjabaad Bambaano</b>	Wargelinta dugsiga, booliiska ama madaxda dab-dembiska marka lagu sheego bambaano dugsiga ama goob u dhow dugsiga xitaa yeysan jirin suurtagalnimada in aad rumeysato in bamkaasi la dhigay dugsiga.	Yar/Kow Culus/Rep	3 — 4 4
<b>Tuugo</b>	Gelitaanka dhismaha dugsiyada degmada ogolaansho la'aan ujeedadiisu tahay in aad gasho fal dambiyadeed marka dhismuhu ka xidhan yahay Ardayda iyo dadweynahabac.	Yar/Kow Culus/Rep	3 — 4 5
<b>Si xun oo ukas ah isticmaalida hantida</b>	Isticmaalka si ula kac ah iyadoo la haysan ogolaansho haboon hanatida uu leeyahay dugsiga ama shakhsi iyadoo ujeedadu loo isticmaalay ahayn tii loogu talagalay ama si ay dhici karta in khasaare soo gaadho hantidaasi.	Yar/Kow Culus/Rep	1 — 2 2 — 3
<b>Digniinta Dabka Been ah</b>	Wargelinta dabka dugsiga ama madaxda dab-demiska ama daarista diginiinta dabka iyadoo aysan jirin wax dab ah oo dhacay.	Yar/Kow Culus/Rep	3 — 4 4
<b>Khamaarka</b>	Ciyaarista xirfad kasta oo ciyaareed ama lacago la kala helayo ama wax kasta oo qiimo leh.	Yar/Kow Culus/Rep	1 — 2 2 — 4
<b>Haysashada Hanti La Soo Xaday</b>	Haysashada hanti qof kale ama qof lagu helo haysashada hanti la soo xaday marka qofkii lahaa aaminsan yahay in laga xaday, ama qof kale u haysto isagoon u haysan wax ogolaansho ah.	Yar/Kow Culus/Rep	1 — 3 3 — 4
<b>Xootooyo, Yar</b>	Xootooyo: qaadashada hantida dugsiga ama shaqsi kale ama koox kale iyada oo aanad ogolaansho u haysan inaad qaadata. Xootooyo Yar: waxa ka mid ah alaabta qiimahoodu ka yar yahay \$20(labaatan) doolar, laakiin waxa aan ku jirin alaabta shaqsi si gaar u leeyahay sida, boorsada jeebka, boorsooyinka ama furayaasha.	Yar/Kow Culus/Rep	1 — 3 3 — 4
<b>Xootooyo, Culus</b>	Wax aka mid ah alaabta qiimahoodu ka badan yahay \$20 doolar ama fure kasta, boorsooyinka ama boorsada jeebka marka laga yimaado qiimaha alaabta ku gudo jirta.	Yar/Kow Culus/Rep	2 — 4 3 — 4
<b>Waxyeleynta Hanti, Yar</b>	Waxyeleynta: Si ula kac waxyeleynta ama kharibaada dhismaha dugsiga ama hantida dadka kale. Waxyeleynta Yar: Waxa ka mid ah waxyeelo yar oo la hagaajin kari ama dib loo bedeli karo iyadoo wax kharash dugsiga degmadu ku bixin.	Yar/Kow Culus/Rep	1 — 2 2 — 3
<b>Waxyeleynta Hanti, Weyn</b>	Waxa ka mid ah xaaladah kharash-gareyn doona Dugsiyada Degmad inay dib u hagaajiyaan ama qeybtii waxyeeladu gaadhay bedelaan, ama waxyeelo la xidhiidha is-hortaag xoogan hawlihii dugsiga, sida burburinta diiwaanada dugsiga.	Yar/Kow Culus/Rep	2 — 4 3 — 4

**ILAAALINTA AMNIGA JIREED IYO MIDKA MASKAXEEDBA**

<b>Hanjibaada sababeyso halista cabsida</b>	Jirka, afka, qoraal ama tallabada elكتروoniga ah taasi oo si degdeg ah u abuuraysa halista cabsida, iyada oo aan soo bandhigeynin hubka iyo waxyeelyada werarka jirka saxda ah.	<b>Fasalka PreK-5aad</b>	
		Yar/Kow Culus/Rep	2 — 3 3 — 5
<b>Werarka jirka/halis</b>	Tabasho kas ah ama garacis shaqsi kale oo aan rali ka aheyn isaga ama iyada; ama si kas ah u waxyeelyo jirka shaqsi.	<b>Fasalka PreK-5aad</b>	
		Yar/Kow Culus/Rep	2 — 3 3 — 5
<b>Muujinta qaab cad oo diyaar ahaanso dagaal</b>	Muujinta galmada, jinsi, ama wax muujinaya dagaal diimeed oo cad.	Haddii shaqaaluhua	3 — 5
		Yar/Kow Culus/Rep	1 — 3 3 — 5
<b>Baad</b>	In lagu qasbo dadka kale iyaga oo raali ka ahayn, sida iyada oo la weydiisto lacag.	Yar/Kow Culus/Rep	2 — 4 3 — 4
<b>Dagaal</b>	Dagaal ay qeyb ka qaataan labo dhinac faro saar ah, sida riixid, tuuris iyo wax lagu dhufto, dhaawac ha jiro ama yaanu jirine (sida, dagaal labo dhinac ah).	Yar/Kow Culus/Rep	1 — 4 2 — 4
<b>Rash ama waxyaabaha qarxa ah</b>	Isticmaalida ama haysashada nooc kasta oo rasha, rashka baaruuda leh, rasaas, ama waxyaabaha qarxaha ama waxyaabo kale.	Culus/Rep Haddii Hub	3 — 5 6
<b>Dhibaateynta ama Cago-jugleynta, dadka kale</b>	Si joogta ah u werwerin gelinta, iyadoo aad dhibeyso ama ciqaabid; erayo xadgudub oo cay ah. Dhibaateyn, ku xidhiidhsaneyn galmo, (jidh ahaan, af ahaan, ama nafsi ahaan). Dhibaateyntu waxay dhici kartaa dhowr qaab, oo ay ku jiraa mid afka ah iyadoo laguugu yeedho magacyo aanad raali ka ahay, sidoo kale akhlaaqiyaad aan hadal ahayn, sida sawiro iyo hadalo qoraal ah, ama mid jir ahaan lagu baqo galiyey, dhibaateeyey, ama hoos lagu dhigay.	Yar/Kow Culus/Rep	1 — 2 3 — 4
<b>Dhibaateynta ama Cago-jugleynta ku saleysan Laxaad La'aanta</b>	Cabsi-gelinta ama habdhaqan ku xadgudubya Ardayga isagoo u eegayo laxaad la'aantiisa. Dhibaateyntu waxay u dhici kartaa dhowr qaab, iyadoo ay ku jirto ficilo afka ah, ugu yeeris magacyo aanu raali ka ahayn, sidoo kalena akhlaaqiyaad aan hadal ahayn, sida sawiro iyo hadalo qoraal ah, ama mid jir ahaan lagu baqo galinayo, dhibaateynayo ama hoos loogu dhigayo.	Yar/Kow Culus/Rep	1 — 2 3 — 4
<b>Dhibaateynta ama Cago-jugleynta ku saleysan Goobta Galmada ama Xoriyadda Jinsiga</b>	Cabsi-gelinta ama hab-dhaqanka ku xadgudubka ardayga oo ku saleysan goobta galmada ama xoriyadda jinsiga. Dhibaateyntu waxay dhici kartaa dhowr qaab, oo ay ku jiraa mid afka ah iyadoo laguugu yeedho magacyo aanad raali ka ahayn, sida garaafka iyo bayaanada qoraalka ama akhlaaqa waa hanjibaada jirka, haslita ama cambaareynta.	Yar/Kow Culus/Rep	1 — 2 3 — 4
<b>Dhibaateynta ku Saleysan Diinta</b>	Cabsi-gelinta ama habdhaqan ku xadgudubya Ardayga isagoo ee ku saleysan diinta. Dhibaateyntu waxay dhici kartaa dhowr qaab, oo ay ku jiraa mid afka ah iyadoo laguugu yeedho magacyo aanad raali ka ahayn, sida garaafka iyo bayaanada qoraalka ama akhlaaqa waa hanjibaada jirka, haslita ama cambaareynta.	Yar/Kow Culus/Rep	1 — 2 3 — 4
<b>Hagar-daameyn khatar ah</b>	Ficil kasta oo xilkasnimo-daro ah ama si badheedh oo khatar u gelinaya caafimaadka maskaxda, caafimaadka jidhka, ama nabadgelyada Ardayda iyadoo ujeedadiisu tahay abuuritaan xubnimada am aka mid noqoshada koox Arday ah, urur, ama fasal.	Yar/Kow Culus/Rep	1 — 2 3 — 4
<b>Cabsi-gelin</b>	Ficil ku qasbida ama niyad-jabinta kaasi oo abuureysa cabsi, baad ka qaadis. (Sidoo kale fiiri Baada)	Yar/Kow Culus/Rep	1 — 2 3 — 4

<b>Wadista Baabuur Si aan Taxadir ku jirin</b>	Wadist baabuur ama baabuur iswada agagaarka dugsiga iyadoo loo kaxeynayo si aan taxadir lahayn ama khatar lagu geliyo caafimaadka ama nabadgelyada ama lagu rabisho habsami u socodka waxbarashada.	Yar/Kow Culus/Rep	2 — 3 3 — 4
<b>Dhaca(budhcad)</b>	Iyadoo hanti qof kale aad ku qaadata xoog ama xoog ugu hanjabto.	Yar/Kow Culus/Rep	3 — 4 4
<b>OGOW: Anshax-marinta ku xadgudubka hubku iyadoo loo eegin nooceeda, iyadoo wada-tashi lala sameeyey Dugsiga Degmada iyo Waaxda Anshax-marinta.</b>			
<b>Hub, Khatar</b>	Hub kasta, shay, qalab, waxyaabaha ama walxaha kuwaas <u>xaaladaha loo isticmaalay</u> , la isku dayey in loo isticmaalo ama lagu handaday in loo isticmaalo, waxay diyaar u yihiin ama <u>awoodaan in ay sababaan dhimasho ama dhaawac halisa oo jidheed.</u>	Dhacdo Kasta	6
<b>Hub, Dilaa ah</b>	Haysashada qalab kasta, shay ama walax loo qaabeeyey iyadoo awood u leh inay sababto dhimasho ama dhaawac halis ah oo jidheed.	Dhacdo Kasta	6
<b>Hub, Qori</b>	Haysashada qori; waxaa ku jira inkastoo aysan ku xadidneyn qoriga loogu talagalay ama diyaar u ah isagoo loo bedeli karo in uu sameeyo qarax iyo qarax kasta, dab dhalin kara, ama hawooyinka wax sumeeya (Qeybta 921 Cinwaanka 18 ee Xeerka Maraykan.) "Haysashada waxaa lagu qeexaa inay ka mid tahay, iyada oo aan ku koobneyn in la helo hubkii: (1) meel loo qoondeeyey Ardayga sida sanduuqa ama miiska, (2), Ardayga qof ahaan ama hantidiisa(jidhka Ardayga, dharka Ardayga, baabuurta), (3) (2) on the student's person or property (on the student's body, in student's clothing, in an automobile), (3) Tusaale ahaan Ardaygu awoodeeda leeyahay, ama sahal u ah inuu heli karo oo ku qorsoon dugsiga. Qoryaha lagala wareego Ardayda waxaa loo gudbiyaa Booliiska.	Dhacdo Kasta	6
<b>Hub, Hub loo ekeysiiyey</b>	Haysashada walxo loo ekeysiiyey, laakinse aan ahayn, mindiyo, qoryo, ama hub kale.	Dhacdo Kasta	3 — 5
<b>Dembiyo kale oo la mid ah</b>	Dhiirigelinta ficilo kale oo la mid ah kuwaas oo khatar gelinaya qof ahaan ama fayyo-qabka dadka kale.	Yar/Kow Culus/Rep	La mida dembiyo la xidhiidha
<b>JAWI WAXBARASHO OO HABOON</b>			
<b>Rabshid</b>	U dhaqanka in aad rabashto ama faro-geliso nidaamka socodka waxbarashada, oo ay ka jirto galmood raali la iskaga yahay.	Yar/Kow Culus/Rep	1 — 2 2 — 4
<b>Ku-Xadgudbida xeerka Labiska</b>	Labis qaadashada ama isqurxinta abuur kara rabish ama u dhow inay rabishaan jawiga waxbarashada ama nidaamka, ama khatar ku ah fursada waxbarashada, caafimaadka ama nabadgelyada Ardayda ama cid kasr oo kale. Waxa ay ku jirtaa xadgudubyada xeerka labiska ee dugsiga u dhigan.	Yar/Kow Culus/Rep	1 — 2 2 — 3
<b>Been-abuur</b>	Bixiinta saxeex been-abuur ah ama wax ka bedelka dukementiyada dugsiga.	Yar/Kow Culus/Rep	1 — 2 2 — 3
<b>Lagu Aqoonsado Xubin Qawleysata (Gang)</b>	Soo bandhigida qalab muujinaya in Ardaydu xubin ka yahay ama la xidhiidho qawlaysato, waxaa ku jira dhaqamo cadeynaya. (consult with SRO for current trends)	Yar/Kow Culus/Rep	1 — 3 3 — 4
<b>Is-Qaawin</b>	Soo bandhigida xubnaha cawrada jirka si aan anshaxa ku jirin ama goobaha dadweynaha la isku qaawiyo. Xubnaha cawrada oo la tuso qof kaleent to another person.	Yar/Kow Culus/Rep	1 — 2 3 — 4
<b>Dhaqdhaqaaqinta Jirka bilaa asluub ah</b>	In aad dhaqaaqiso jirkaaga taasi oo ka cadheysiineysa dadka, fusuq ama fariin muujineysa galmood.	Yar/Kow Culus/Rep	1 — 2 3 — 4
<b>Caasiyiinta, Diidmo-cad, Ula-kac Caasinimo</b>	Qofkii guuldareysto inuu si wanaagsan ugu hogaansamo amarka masuulka ama tilmaamta xubin katirsan shaqaalaha.	Yar/Kow Culus/Rep	1 — 2 3 — 4
<b>Dhego-adeyg (diidmo)</b>	In aad ka dhego-adeygtu inaad raacdo tilmaamaha haboon ee lagu siiyey ama amarada xubin shaqaalaha ka mid ah.	Yar/Kow Culus/Rep	1 — 2 3 — 4
<b>Faragelinta Shaqaalaha Dugsiga</b>	Ishortaaga ama iskudeyga in aad shaqaalaha iska hortaagto inay gutaan masuuliyadahooda adigoo qaab ay ku jirto handadaad, rabshada ama dhibaateyn.	Yar/Kow Culus/Rep	2 — 4 3 — 4
<b>Luqad, Cay/Najis</b>	Qoritaanka ama dhidha wax kasta oo lala yaabo ama hoo su dhigaya sharafta qof kale iyadoo loo eegayo da'da, midabka, caqiidadiisa, laxaad la'aantiisa, xaaladiisa guur, asalkiisu meesha uu ka soo jeedo, diintiisa, lab iyo dhedig, jinsiga ama nooca guurkiisa.	Yar/Kow Culus/Rep	1 — 2 3 — 4
<b>Ficilo Aan Waafaqsaneyn Anshax</b>	In aad ku guuldareysato inaad sameyso horumar la taaban karo oo ku wajahan dhammeystirida hawshii lagu egmaday ama faragelin.	Yar/Kow Culus/Rep	1 — 2 3 — 4

<b>Diidmo Cad</b>	Af ahaan diidayana inuu raaco tilmaamaha ama amarada xubin shaqaalaha ka mid ah.	Yar/Kow Culus/Rep	1 — 2 3 — 4
<b>Taabasho aan Habooneyn</b>	Riixida, Tuurista, Dagaal lagu ciyaaro ama taabasho aan habooneyn oo aan dhibaato keeneyn.	Yar/Kow Culus/Rep	1 — 2 3 — 4
<b>Qishka/Daacad ahayn</b>	Soo bandhigida shaqo qof kale qabtay sidii ay tahay shaqadaadii.	Yar/Kow Culus/Rep	1 — 2 3 — 4
<b>Haysashada waxyaalo mamnuuc ah</b>	Haysashada waxyaabo ka mamnuuc ah dugsiga. Waxaa ku jira qoryahay caruurto ku ciyaarto(tooy) kuwaas oo aan u ekeyn qoryaha dhabta ah. (Sida qoryaha runta ah, <b>anshax-marinta qoryaha caruurto ku ciyaarto waa in lala tashadaa Dugsiga Degmada ee taageera waalidka iyo Waaxda Anshax</b> ).	Yar/Kow Culus/Rep	1 — 2 3 — 4
<b>Teknoolijiga, Xadgubida Isticmaalka</b>	Qalabka teknoolijiga oo loo isticmaalo wax aan ahayn wixii shaqaalaha dugsigu kuu siiyeen inaad ku qabato, ku xadgubida ammaanka internet-ka.	Yar/Kow Culus/Rep	1 — 2 3 — 4
<b>Tubaakada, Isticmaalka iyo/ama Haysashadiisa</b>	Isticmaalida ama haysashada Ardaygu da'duu doono ha ahaadee nooc kasta oo tubaako/buuri ah ama qalabka lagu gudbiyo nikotiinka ama meel ku dhow dugsiga iyo waliba meelaha ay hawlaha dugsigu ka socdaan iyada oo aan loo eegin goobta.	Yar/Kow Culus/Rep	1 — 3 3
<b>Diidmo Ula Kac ah</b>	Diidmo lagu celceliyo ama ku guuldareysiga in aad fuliso amarada ama tilmaamaha ay siiyaan xubnaha shaqaalaha.	Yar/Kow Culus/Rep	2 — 3 3 — 4
<b>Dembiyo Kale oo La Mid ah</b>	Dhiirigelinta ficilada kale ee la mid ah kuwa hakinaya habkii waxbarashadu u socotay ama faragelinaya barista iyo barashada.	Yar/Kow Culus/Rep	La mid ah dembiyada kale

### QIYAASTA ANSHAX-MARINTA KHAMRADA/DAROOGADA

**OGOW: Anshax-marinta xadgudubyada khamrada ama daroogada waa in loo raaca sida uu sheegayo 4.30.022 AD(<http://www.pps.k12.or.us/departments/board/878.htm>)**

XADGUDUB HORE	XADGUDUBKA HADDA		FICILKA ANSHAX-MARINTA
Haddii xadgudubkii ugu horeeyey ahaa.....	3 sano ee ugu la soo dhaafay, kani ma kii 1aad, 2aad ama baaritaankii 3aad? *	Xadgudubkani ma wuxuu haysasho/isticmaal/gudbin/ii bin?	Ka bacdi Heerka Ficilku wuxuu noqon doonaa:
N/A	Koowaad	Haysasho/Isticmaalid	Heerka A
N/A		Gudbin/libin	Heerka B
Haysasho/Isticmaalid	Labaad	Haysasho/Isticmaalid	Heerka B
Gudbin/libin		Haysasho/Isticmaalid	Heerka C
Haysasho/llibin		Gudbin/libin	Heerka B
Gudbin/libin		Gudbin/libin	Heerka C
Xadgudubyo Kasta	Saddexaad	Haysasho/Isticmaalid	Heerka C
Xadgububyo Kasta		Gudbin/libin	Heerka Sidiic

\* Sidii natiijo looga gaadhi lahaa dhacdo waa in dhageysi maamulku u qabtaa warqadna loo diraa waalidka/wakiilka lagu sheego go'aanka.

HEERKA TALAABAD ANSHAX-MARINTA	SHARAXAAD
Heerka A*	Fasalada loogu talagalay Ardayd jabisa xeerasha dugsiga ee khamrada/darooga iyo Ardayda laga mamnuucay tartanada dugsigu qabanayo, ciyaaraha iyo waxqabadyada 28 maalmood. Intaas waxaa dheer, go'aanka uu iska leeyahay maamulku, waxaa dhacda in ay dugsiga ka eryaa 5 maalmood (kaliya ka dib dhegeysiga dacwada, haddii natiijadu barista lagu sameeyey tahay Heerka A) iyo/ama loo baahdo inuu qabto ugu yaraan (8) saacadood oo addeega bulshada ah.
Heerka B*	Cayrinta. Waxa suurtagal ah in dib loo dhigo cayrinta haddii Ardaygu aqbalo barnaamij badiil ah oo dugsigu ogolaaday ama addeegyada daaweynta kuwaas oo tilmaamaya dhibta khamrada iyo daroogada. Ardayda laga saaray Dugsiyada Degmada iyo Hawlaha Dugsiyada Degmada ilaa iyo inta qorshe bilow ah uu dugsigu ku hawlgelinayo abuurto inta lagu gudo jiro waqtiga cayrinta.
Heerka C*	Cayrin.

\*Bedelka Tallaabooyinka Anshax-Marinta, qorshaha badiilka waxa suurtagal ah in loo habeeyo (fiiri qeybta mawduuceedu yahay Khamrada iyo Hawlaha La Xidhiidha Daroogada).

Nidaamyo gaar ah waa in loo raacaa Ardayda laxaadka la' ama Qeybta caadiga ee qorshayaasha 504 kuwaas oo aan ka eryin karin dugsiga wax ka badan (10) maalmood oo isku xiga sanad-dugsiyeed kasta, gooni uga saarka dheeraad ah ilaa (10) maalmood oo ah maalmaha dugsiga ah inkastoo taasi ay muujineyn wax soo noqnoqday, ficilada gaarka ah anshax-xumada kuwaas oo aan muujineyn inay soo noqnoqdeen, ama haddii Ardaygu loo tixgelin in la cayriyo tixraac A:30.025-AD.

### **Qoraalo dheerada**

Qaar ka mid ah xadgudbyada waxaa dhici karta in lala xidhiidho Xafiiska Booliiska ee Portland.

**Xoog kasta oo ay isticmaalaan** shaqaalaha Dugsiyada Dadweynaha Portland, ama caawiye waa in uu ku jaan go'an yahay siyaasada degmada iyo hab-nidaamiyaha khuseeya xakmeynta Ardayda iyo gooni-u-saarida 4.50.060 – AD-**Xakameynta iyo Gooni-u-Saarida.** Xoog lagu xakameeyo ama gooni-u-saarida waxa la isticmaali karaa haddii la arko oo ay cadaato habdhaqanka Ardaygu inuu khatar maangal ah oo la hubo yahay, Ardayga oo uu soo gaadho dhaawac jidheed oo khatar ah ama kuwa kale, iyo faragelin fudidi noqon mayso mid meel mar ah. Kaliya shaqaale loo tababaray oo uu ansixiyey degmadu hababkani ayaa meel marin kara xakameynta ama gooni-u-saarida marka laga reebo xaaladaha degdega ah ee marka shaqaale loo carbiyey aan si dhakhso ah loo helin karin iyadoo ay sababtu tahay xaalada degdega oo aheyd mid aan la saadaalineyn.

Ardayda ku jira xiliga gebogabada Dugsiga Sare waxaa laga joojin doonaa ka qeybgalka xaflada qalin-jabinta iyo hawlaha la xidhiidha haddii la ogaado 60 maalmood oo isku xiga in falal xadgudubyo oo ku aadan siyaasada khamrada iyo daroogada ee Degmada, ama xadgudub kale oo sababi kara in saddex maalmood ama ka badan laga cayriyo, ama tallaabo adag oo anshax marin ah oo culus.

### **Nidaamyada Eryidda**

Macnaha eryidi waa Ardayga ma iman karo dugsiga ama kama qeybqaadan karo hawlaha Dugsiyada Dadweynaha Portland. Erigu wuxuu qaadan karaa ilaa 10 maalmood oo maalmaha dugsiga ah.

Sida uu dhigayo nidaamka shaqo ee Degmadu, maamulka

dhismaha waxaa looga baahan yahay in ay la xiriiraan Agaasimahooda Sare marka ay tixgelinayaan 2 ama in ka badan oo ah dhacdo eryid, ama haddii uu ardaygu isla hadaba yeeshay 2 ama in ka badan oo ah dhacdo eryid, maamulka dhismuhu waa in ay la xiriiraan Agaasimahooda Sare haddii ay tixgelinayaan dhageysiga dacwada eryida.

Kulan aan caadi ahayn oo u dhaxeeya qofka haboon ee dugsi (hoggaamiyaha kooxda, kaaliyaha maamulka, maamulaha) iyo Ardayga ka hor inta aan la eryin haddii si degdeg ah loogu baahan in la eryo.

Marka loo baahdo, waa in waalidka/wakiilka ama Ardayga la siiyaa addeega turjubaanka.

Waa la wargelin Waalidka/wakiilada marka Ardayda la eryo dugsi. Kulanka waalidka/wakiilka ayaa la qaban ka hor inta aan dib loodu oggolaan Ardayga dugsi.

Ardayda waxaa laga rajeynayaa inta ay eryida ku maqan yihiin in ay dhammeystiraan shaqooyinka-guriga ama codsaan wixii shaqooyin ah ee ay seegeen intay maqnaayeen.

Ardaygii la eryey waa in aanu iman hantida uu leeyahay Dugsiyada Dadweynaha Portland ama hawl kasta oo kafaalo qaaday dugsi.

Kulan lala leeyahay waalid/wakiilka caadiga waa in la qabtaa ka hor inta aan ardaygu ku soo laaban dugsi ka dib waqtiga eriga si loo raadiyo anshax-xumada isla markaana dib loo eegaa siyaabo lagu wanaajinayo hab-dhaqanka ardayga. Waalid/wakiilka waxay codsan karaan kulan ay yeeshaan maamulaha ama qof loo qoondeeyay si loo dejiyo qorshe wax qabad oo loogu talagalay ardayga si looga hortago dhacdooyin dheeraad ah.

Arday ama waalid/wakiil raba inuu racfaan ka qaato eryida waa in uu la xidhiidha maamulaha si uu ugu diyaaro kulan.

## **Nidaamyada Cayrinta**

Macnaha cayrintu waa Ardaygu ma iman karo dugsiga ama hawlaha dugsigu qabanayo ee Dugsiyada Dadweynaha Portland ilaa hal sano oo sanad-dugsiyeed waxbarasho ah.

Xadgudubyada Hubka ama qaar ka mid ah qoryuhu waxay keenayaan in dugsiga laga cayriyo Ardayga hal sano oo sanad-dugsiyeed waxbarasaho.

Ka hor inta aan Ardayga laga cayrin dugsiga, dhegeysi dacwadeed ayaa loo qabanayaa waalidiinta/wakiilada Ardayga, iyo sarkaalka dhageysiga dacwada. Sarkaalka dhegeysiga dacwadu wuxuu go'aamin haddii Ardayga laga cayrinayo dugsiga, sidoo kale haddii inta la cayrinayo.

Marka loo baahdo, addeegyada turjubaanka waa in la siiyaa Ardayda iyo/ama waalidiinta/wakiilada.

Arday laga cayriyey dugsigu waa in aan iman hantida Dugsiyada Dadweynaha Portland ama hawlo kasta dugsiyeed ay kafiilo qaadeen dugsiyadu.

Ardayga ama waalidka/wakiilku waxa weydiisan karaan dib-u-eegis in lagu sameeyo cayrin kasta ama in dib loo dhigo go'aanka cayrinta.

## **Anshaxa Ardayda Laxaadka La'**

Dhammaan Ardaydu waa in ay u hoggaansan yihiin nidaamyada anshaxa si loogu kobciyo isbedelo taban oo ku aadan akhlaaqdooda iyadoo laga badbaadinayo kuwa kalena.

Ardayda haysta IEP (Waxbarashada Gaarka ah), qaybta rasmiga ah ee qorshaha 504 ama lagu tilmaamay in ay helaan waxbarasho gaar ah, nidaamyo dheeraada yaa laga yaabaa in la raaco si loo weexo haddii Ardayga laga saarayo sababo anshax awgood.

Waxaa jira nidaamyo gaar ah oo xadidaya Ardayda IEP (Waxbarasho gaar ah), qaabka qorshaha qeybta 504 ama kuwa lagu dhigay waxbarashada gaarka ah isla kuwaas oo dugsiga laga eryey in ka badan 10(toban) maalmood oo ka mid ah sanad-dugsiyeedka.

Marka ay tallaabooyinka anshax-marinta ku jiraan eryid ama cayrin, maamulka dugsigu waa in ay ogeysiiyaan waalidiinta/wakiilada/waaliga sida ay u wargelinayaa Ardayda aan laxaadka la'ayn. Waaxda Waxbarashada Gaarka waxay wargelin doonaan waalidiinta/wakiilada/waaliga kulano kasta oo waxbarashada gaarka ah.